

# Fahamka saamaynta ADA iyo xuquuqaha naafanimo ee Caydha Ilmaha



## Qeexitaanada

**ADA:** Americans with Disabilities Act (Xeerka Naafad Maraykan)

**Saxxiibka:** Sida ay la xidhiidha Xuquuqda II iyo Qeybta 504. Waxaa ku jiri kara xubin kasta oo qoyska ka mid ah, saaxiib, ama wehelka qof doonaya ama helaya adeegyada daryeelka carruurta.

**DCYF:** Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska)

**Naafada:** Labada ADA iyo Qeybta 504 waxay ku qeexaan naafanimada sida: "naafo jidheed ama maskaxeed oo si xad dhaaf ah u xaddidaysa hal ama in ka badan hawlo nololeed oo waaweyn." Hawlaha nolosha ee ugu waaweyn waxaa ka mid ah waxyabo ay ka mid yihiin daryeelka nafta, qabashada hawlaha gacanta, neefsashada, hadalka, socodka, akhriska, barashada, xoogga saarista, aragga, maqalka, cunista, hurdada, ama shaqada. Hawlaha nolosha ee ugu waaweyn waxa ka mid ah hawgelinta shaqooyinka jidhka, oo ay ku jiraan waxyaalaha ay ka midka yihiin hawlaha habka difaaca jidhka, dheefshiidka, mindhicirka ama kaadiheyesta, neerfaha, maskaxda, ama shaqooyink taranka.

## Mas'uuliyyadda

- Wakaalada iyo shaqaalaheeda ayaa looga baahan yahay inay hubiyaan in adeegyada ay heli karaan waalidiinta iyo carruurta naafada ah ee ku hawlan DCYF.
- Adeegyada iyo barnaamijyada waa in wax laga beddelo si loo hubiyo in ka qaybgalayaashu ay ka faa'iidsan karaan.
- Barnaamijyadu waa inay siiyaan dadka naafada ah fursad loo siman yahay oo ay kaga qeyb qaadanayaan, ugana faa'iidsan karaan, barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha ururka.

**Qeybta 504:** Qeybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 waa sharcii fadaraal ah oo ka ilaaliya shakhsiyadka tkoorka ku salaysan naafada. Qeybta 504 waxay sheegaysaa ma jiro shakhsii u qalma oo naafso ah oo laga saarayo ka qeybgalka ama loo diidi karo faa'iidooyinka adeegyada, barnaamijyada, ama hawlaha cid kasta oo hesha kaalmada maaliyadeed ee fadaraalka.

**Xuquuqda II:** Xuquuqha II ee ADA waxa uu mamnuucayaa in shakhsiga naafada ah laga saaro ka qeybgalka ama loo diido kababka adeegyada, barnaamijyada, ama hawlaha hay'ad dadweyne, ama in lagula kaco takoorid hay'adaasi. Xuquuqda II waxa ku jira wakaaladaha daryeelka carruurta iyo nidaamyada maxkamadaha.

- Barnaamijyadu waa inay bixiyaan wax ka beddel macquul ah oo lagu sameeyo siyaasadaha, dhaqamada, iyo nidaamyada marka loo baahdo si looga fogaado tkoorka.
- DCYF iyo shaqaalaheedu waxay qaadi doonaan tallaabooyinka ku habboon si loo hubiyo in xidhiidka lala yeesho codsadaayaasha, ka qeybgalayaasha, xubnaha dadweynaha, iyo saaxiibada naafada ah inay waxtar leeyihiin iyada oo loo marayo bixinta caawimada iyo adeegyada.

DCYF iyo shaqaalaheeda, waxa ay mas'uuliyyad ka saaran tahay in ay bixiyaan qorshe adeeg kiis gaar ahaaneed oo ka madax bannaan mala'awaal ku salaysan naafonimada qofka. Wakaaladu waxay mas'uul ka tahay hubinta in carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska Washington ay helaan fursad buuxda oo siman si ay u helaan barnaamijyada iyo adeegyada DCYF.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan hoyga ADA, fadlan kala xidhiidh Iskuduwaha ADA 360-480-7230 ama iimaylka [dcyf.accessibility@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.accessibility@dcyf.wa.gov).

## Xeerka Aasaasiga ah ee hoos yimaada Xuquuqda II ee ADA iyo Qeybta 504

### Daaweynta Shaqsiga ah.

Shakhsiyadka naafada ah waa in loola macaamilaa calaa kiis si waafaqsan xaqiyooyinka iyo caddaynta ujeeddada. Tusaale ahaan, kala saarida carruurta iyo waalidka naafada ah ee ku salaysan caqiidada khaldan, oo aan la taageerin qiimeyn shakhsii ah, in dadka naafada ahi aanay awoodin inay waalidku si badbaado leh u joojiyaan. Daaweynta shakhsii ahaaneed waxaa xooga saaray Go'aanka Maxkamadda Sare ee Washington 2021 M.A.S.C.

**Tusaale:** Marka la falanqaynayo khataraha badbaadada, wada hadalka waa in diirada lagu saaraa habdhqaqanka waalidka iyo/ama tallaabooyinka. Jiritaanka naafanimada kaliya waa in aan lagu qorin ama loo arkin inay caqabdu ku tahay badbaadada.



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**



### Fursad Loo Siman yahay oo Dhammaystiran.

Dadka naafada ah waa in la siyya fursado isku mid ah si ay uga faa'iidaystaan ama uga qeybqaataan barnaamijyada daryeelka carruurta, adeegyada, iyo hawlahu u dhigma kuwa la siyyo shakhsiyadka aan naafada ahayn. Siinta fursad buuxda oo loo siman yahay, hay'adda daryeelka carruurtu waa inay samaysaa wax ka beddel macquul ah oo ay xaqiijiso xidhiidh wax ku ool ah.

#### a. Waxkabedelada Suurogalka ah

Bixinta waxkabeddel suurogal ah ayaa laga yaabaa inay u baahato DCYF inay bixiso gargaar, kabab, iyo adeegyo la xoojiyay, dheeraad ah, ama saayid ah oo ka duwan kuwa la siyyo waalidiinta kale marka loo baahdo si loo xaqiijijo fursad siman oo lagu helo natijjo isku mid ah ama lagu helo kab isku mid ah. Go'aanka Washington M.A.S.C ee 2021 wuxuu muujiyay muhiimada samaynta waxkabedelka suurogal ah ee waalidiinta qaba naafo maskaxeed/koriin ama xaalado kale oo la mid ah neerfaha.

**Tusaale 1:** Haddii fasalo waalidnimo la bixiyo oo waalidka qaba intellectual disability (naafo maskaxeed) uu u baahan yahay hab waxbarid ka duwan ama wakhti waxbarasho oo dheeraad ah oo ku celcelinta iyo hawlqabashada, wakaaladu waa inay siisaa waalidka wakhtiga la dheereeyey iyo/ama habka waxbaridda ee waalidku u baahan yahay si macquul ah. waxkabedelka hoos yimaada ADA.

**Tusaale 2:** Waalidka qaba naafo dhinaca garashada ah, sida Dhaawaca Maskaxda ee naxdinta leh ama xaaladaha kale ee neerfaha, oo ay ku jiraan naafonimada garaadka/koriinka, waxaa laga yaabaa inay leeyihiin cillado saameeya hababka garashada ama xirfadaha maskaxeed ee caawiya qorshaha shakhsia ahaaneed, la socodka, iyo fulinta ujeedooyinkooda. Xirfadahaan ama hababkan waxaa badanaa loo tixraacaa hawlo fulineed waxana ku jira waxyabo ay ka mid yihiin xakamaynta feejignaanta, xusuusta shaqada, xannibaadda, iyo xalinta dhibaatada. Shakhsiyadka qaarkood ee waajahaya hoos u dhac hawl fulineed ayaa laga yaabaa inay u baahdaan qoraal-qaade ama qoraalka waqtiga saxda ah in la bixiyo inta lagu jiro kulamada iyo dhegeysiga si looga caawiyo fahamka. Siinta adeeggan waxaa loo arki doonaa waxkabeddel macquul ah iyo sida bixinta wada xidhiidhis waxtar leh oo hoos timaada ADA.

#### b. Xidhiidh Wax Ku Ool ah

DCYF waa in ay bixiso xidhiidh wax ku ool ah oo hoos yimaada ADA si loo hubiyo in waalidiinta qaba naafonimada garaadka ay fahmaan adeegyada la bixiyo.

Tallaabooyinka ku habboon - oo ay ku jiraan bixinta gargaarka iyo adeegyada, sida turjumaannada luuqadda dadka maqalka naafada ka ah, qoraal-qaadayaasha, adeegsiga luuqad waadix ah, iyo kuwa kale - waa in la qaadaa si loo hubiyo in shakhsiyadka leh wada xidhiidhista iyo nidaaminta naafada ay fahmaan waxa la sheegay ama qoran oo ay si wax ku ool ah ula xidhiidhi karaan sida shakhsiyadka aan naafada ahayn. Wakaaladaha Caydh Ilmaha waa in ay tixgelinta koowaad siyyaan gargaarka ama adeegga uu qofku codsado. Shakhsiyadka qaarkood waxaa laga yaabaa inaysan garanayn noocyada gargaarka ama adeegyada la bixin karo si ay uga caawiyaan inay fahmaan waxa la sheegayo. Haddii su'aalo ay soo baxaan sida gargaarka ama adeegga la bixinayo si loo xaqiijijo wada xidhiidhis waxtar leh, la xidhiidh Isuduwaha ADA ee DCYF.

Tusaalooyinka gargaarka iyo adeegyada waxaa ka mid ah, kuwo kale, turjumaano aqoon leh, qoraal-qaatayaal, qoraal-wakhtiga sax ah, tignoolajiyada elektiroonigga ah ee la heli karo iyo macluumaadka, agab qoraal ah, iyo qalabka dhegeysiga ee la caawiyay, qalabka maqalka la duubo, agabka fariimaha, agabka farta waaweyn, iwm.

Siinta xidhiidh wax ku ool ah ayaa laga yaabaa inay isbedesho iyadoo ku xiran goobta, tirada dadka ku lugta leh, iyo mowduuca falanqaynta. Nooca gargaarka ama adeeggu way kala duwanaan doonaan si waafaqsan habka wada xidhiidhista ee uu isticmaalo qofka naafada ah; dabeecadda, dhererka, iyo iskudhafka wada xidhiidhista ku lug leh; iyo macnaha guud ee wada xidhiidhista ku socoto.

**Tusaale 1:** Kulamada kiis ee ku lug leh waalidka D/maqalka naafada ka ah, bixinta qof ahaan turjumaano luuqadda dadka maqalka naafada ka ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo. Fariinta fudud sida taariikhda ballanta ama ciwaanka, qoraal caadiya ama qoraal gacanta lagu qoray ayaa ku filan.

*Ogow: la xidhiidhka iyadoo loo marayo qoraal waxa loo isticmaali karaa wada sheekaysi aad u fudud. Luuqadda dadka maqalka naafada ka ah waa luuqad gooni ah lafteeeda, ma aha Ingiriisi, sidaas darteed shakhsiyadka ku hadla Luuqadda dadka maqalka naafada ka ah waxay yeelan doonaan awoodo kala duwan oo ay ku fahmaan Ingiriisiga qoran.*

**Tusaale 2:** Siinta qoraal-qaade ayaa laga yaabaa inay ku filnaato kulamada u dhixeyya shaqaalaha kiiska iyo waalidka, laakiin kulamada isku dhafan sida Kulamada Go'aannada Kooxda Qoyska, Kulamada Qorshaynta La Wadaago, iwm.

Haddii aad aaminsantahay in aad qabto kiis ku lug leh shaqsi naafo ah oo u baahan kara waxkabedel(waxkabedelo) macquul ah ama caawimada ama adeegyada si loo xaqiijijo wada xidhiidhis waxtar leh, fadlan kala xidhiidh Isuduwaha ADA DCYF 360-480-7230 ama iimaylka [dcyf.accessibility@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.accessibility@dcyf.wa.gov).